



## Waalid support Xogta ama Ilaah

Kheyraadka taageerada waalidka wuxuu noqon karaa qalab lagu caawinayo qoysaska. Ilaah waxay noqon karaan qaab wanaagsan oo lahula kulmo waalidka kale, carruurtaadu hala ciyaarto kuwa kale, baro xirfado cusub ama kugu xidhaa adiga macalinka waalidka kaas oo kaa caawin kar inaad ka hadasho caqabado kasto.

WithinReach waa urur aan faa'iido u shaqeyn oo ku caawinaya qoysaska hagidda nidaamyada adag ee adeegga bulshada iyo caafimaadka. Waxaad wax badan oo ku saabsan WithinReach bogga [withinreachwa.org](http://withinreachwa.org).

WASHINGTON  
**WorkFirst**

WithinReach

 Washington State  
Department of Social  
& Health Services  
*Transforming lives*

DSHS 22-1780 SM (Rev. 10/22) Somali

## Kheyraadyo iyo taageerooyin laga helo WithinReach



Helidda caawimaad sax ah ayaa ku adag qoysaska. WithinReach ayaa fududeynaysa.

DSHS WorkFirst oo kaashaneysa WithinReach

WithinReach

 Washington State  
Department of Social  
& Health Services  
*Transforming lives*



## Waa kuma WithinReach?

WithinReach wuxuu aqoonsanayaa in qoys kasta uu gaar yahay. Hawlwadeennadeenna ayaa bixiya misaaxo loo dhan yahay oo xukmin la'aan ah oo looga munaaqashoodo kheyraadyada ugu wanaagsan ee lagu taageeri karo qoyskaaga. Qoysasku waxay awoodaan in ay ka munaaqashoodaan xaaladooda ama daruufahooda iyada oo aan jirin waqti xaddidan.

## Muxuu sameeyaa WithinReach?

Hawlwadeennada WithinReach ayaa waxaa ay kala shaqeyn doonaan qoyskaaga in uu helo kheyraadka waalidnimo ee ka soo baxa baahiyahaaga. Qaar ka mid ah faa'iidooyinka la shaqeynta WithinReach:

- Wadahadal sahlan oo lala yeesho hawlwadeennada.
- Waxaad aqoonsanaysaa mudnaanahaaga
- Hawlwadeennada waxaa ay qaataan waqti ay ku fahmaan baahiyada shaqsi.
- Baaris ku habboon oo loogu talagalay kheyraadka ku saleysan goob iyo baahiyada gaadiidka
- Hawl-wadeennada waxaa ay aqoon qoto-dheer u leeyihiin xaq-u-yeelashada iyo shuruudaha diiwaangelinta
- Gudbinno ku saleysan baahiyadaada
- Kaydka-xogta kheyraadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiyaa

## Waa maxay kheyraadka la heli karo?

Kheyraadka taageerada waalidka waa kuwo kala duwan iyada oo lagu saleynayo baahida qoyskaaga. WithinReach ayaa haysa kheyraadyo loogu talagalay qoysaska iyo waalidiinta carruurta yaryar. Hawlwadeennada waxaa ay ku dadaallaan in ay helaan kheyraadka ka soo baxa mudnaanaha qoyskaaga. Kheyraadka la heli karo waa ay kala duwanaa karaan iyada oo ku xiran xaaladda guryeyntaada, sumadda degaanka iyo da'da cunugaaga.

<b><i>Tusaalooyinka kheyraadka taageerada waalidka:</i></b>
Fasallada dhalmada carruurta
Fasallada waxbarashada waalidka
Kooxaha Barashada iyo Ciyaarta
Sahayda uurka iyo dhallaanka
Adeegyada qof u tababaran caawinta dumarka waqtiga foosha
Barnaamijyada taageerada waalidka ee guriga gudahiisa ah: Bilowga Waqtiga Hore ah, Waalidiinta Macallimiin Ahaan, Ishaashiga Qoyska iyo Kalkaalisada, Barnaamijka Gacamaha Furan ee Gaarista Qof U Tababaran Caawinta Dumarka Waqtiga Foosha, iwm.
Kooxaha taageerada waalidka cusub
Barnaamijyada Bilowga Hore/ECEAP

## Maxaad filan kartaa?

1. Hawlwadeennada WorkFirst waxaa ay gudbin kuugu diri doonaan WithinReach
2. WithinReach waxaa uu baaris ku sameyn doonaa barnaamijyada ka jira degaankaaga
3. WithinReach ayaa ku soo waci doona, fariin ama iimayl kuu soo diri doona
  - Hawlwadeennada ayaa waxaa ay sameyn doonaan dhowr isku-dayo oo ay kuugu xiriirayaan qoyskaaga
  - Waxaa ay kuu dhaafi doonaan fariin cod ah haddii ay telefoonka kaa heli waayaan
4. WithinReach wuxuu dhageysan doonaa walaacaaga iyo mudnaanahaaga
5. WithinReach wuxuu kugu aaddin doonaa kheyraadka sida wanaagsan ugu habboon baahiyadaada
6. WithinReach wuxuu ku siin doonaa liiska kheyraadka laga wada hadlay
7. WithinReach wuxuu sameyn doonaa xiriirrada lala yeesho kheyraadyada bulshada/barnaamijyada marka uu awoodo